



Gaadhiyaal kula safrida caruurta

Sharciga Oostaraliya waxa u doonayaa dhamaan caruurta ka yar 7 sano waa in ay isticmaalan kursi caruurta markay raacaayan gaariga Tan waa in laga ilaaliya caruurta in ay dhaawacmaan hadii ay galaan shil gaadhi.

Nooca kursiga loo baahan yahay waxa uu ku xidhan yahay dada iyo culayska ilmaha. Kursigu waa in uu yahay cabirka saxda ee ilmaha, Run ahaantii la hagaajiyey lana xidhay, si sax ahna ugu dhegan gaadhiga.

Caruurta dadoodu tahay 0-6 bilood

Waa in ay ku safaan kursiga gadaal u jeeda. Kursigu waa in lagu xidhaa kursiga danbe - MAYA kursiga hore.



Caruurta dadoodu tahay 6 bilood ilaa afar sano



- Waxay ku safri karaan kursiga gadaal u jeeda ama horey ee gaadhiga ee suumanka leh, iyada oo ku xidhan cabirkooda. Ilmaha waa in uu ku safaa kursiga caruurta kaliya ee kursiga danbe - MAYA kursiga hore.
- Waxaa hada la helaa kuraasta caruurta oo ku samaysan Suumanka caruurta ilaa kuwa jira 8 sano.

Caruurta jirta 4 ilaa ugu yaraan 7 sano




- Waxay ku safri karaan kuraasta gaadhi ee hore u jeeda ama kursi dheereyaha, iyada oo ku xidhan cabirkooda. Kuraas dheereyaha wuxuu kor ugu qaadaa ilmaha meel sax ah oo suunka le'ekaysiin.
- Caruurta dadoodu tahay 4-7 sano waxay ku safri karaan kaliya kursiga hore (iyaga isticmaalaya kursi dheereye) haddii dhamaan kuraasta danbe ay ku fadhiistaan caruurta ka yar 7 sano.
- Kuraas dheereyaha leh suunka xadhiga danbe iyo kore way ka amaansan yihiin noocyada kale ee kuraas dheereyaha.
- Caruurta waa in ay isticmaalaan kuraas dheereyaha ilaa ay ka gaadhayaan dhererka 145cm. Haddii ay isticmaalaan suunka dadka waaweyn iyaga oo aan gaadhin, waxay khatar weyn u yihiin in ay dhaawacmaan hadii ay shil galaan.

Rakibida kursiga

Had iyo jeer raac tilmaamaha warshada haddii kursiga ilmaha ama kursi dheereeyaha aad ku xidhayso gaadhiga.

Caruurta ka yara 4 sano, ku xidhida kursiga macnaheedu waa:


- Kursiga waxa lagu xidhaa gaadhiga iyada oo suunka laga dhex bixinayo duleelada loo calaamadeeyey ka dibna lagu adkaynayo.



- Suunka kore waxa la sudhayaa gaadhiga.




- Suumanka waa la adkeeyaa si ay ugu hayaan ilmaha kursiga.



Caruurta ka wayn 4 sano, waxay ku safri kursi dheereeyaha:

- Haddii suunka kore la sudho gaadhiga.
- Suunku waxa u baahan yahay in lagu adkeeyo wareega ilmaha.



Doorashada kursiga

Kaliya kuraasta ilmaha iyo kuraas dheereeyaha buuxiya shuruudaha amaanka Ostaraaliya (AS/NZS 1754) ayaa la ogal yahay in la isticmaalo. Taas macnaheedu waa kuraasta gaadhiga ee laga soo gaday wadamada kale lagama ogola Ostraliya.



Isku day in aadan isticmaal in kursi ama kursi dheereye la soo isticmaalay waxa laga yaabaa in uu jaban yahay amaana ma noqon doono.

Waxa jiri doono ganaaxyo wayn iyo dhibcaha laysanka oo aad waydo isticmaali la'aanta kuraasta ilmaha. Ganaaxyadan waxa lagu fulin qof walba oo ku jira gaadhiga oo aan suunka u xidhnayn si sax ah.